Aaditaanka maxkamadda – Akhbaarta aad u baahan tahay

Somali

Waxaa daabacay Home Office Communication Directorate Maaso 2004

Tusmo

Waxaa laguu eedayay dembi, waxaana hadda lagaa doonayaa inaad aadid maxkamadda. Warqaddaan waxay kugu caawimaysaa inay kuu diyaariso waxa dhaci doona. Waxay ku siinaysaa wararka soo socda:

01 Xaalkaaga hadda

02 Helitaanka Garyaqaanka

03 Maxaa dhacayaa haddii aadan tegin maxkamaddadda

04 Maxaad samenaysaa haddii aadan imaan karin maxkamadda

05 Maxaad u baahan intaadan tegin maxkamadda

06 Tegitaanka maxkamadda

07 Maxkamadaha kala duwan iyo qof waliba wuxuu qaabbilsan yahay

08 Siday maxkamadda u socoto

09 War intaas dheer

10 Buugga Ballamaha

11 Tifaftirka waxa ku jira

Warqaddaan boggeeda dambe wuxuu kaloo ku siindoonaa warka xaafadaada iyo tifaftir adiga kuu muhiim ah.

01 Xaalkaaga hadda

- Booliiska wuxuu kugu soo eedeeyay dembi waxaana lagu siiyay warqad laguugu sheegayo dembiga laguugu eedaynayo.
- Waxaad heshay damaanad boliis ama, haddii laguu diiday damaanad, waa lagu haynayaa inta lagaa hor keenayo maxkamadda.
- Warqadda damaanadda waxay kuu sheegaysa halka, taarikhda iyo saacadda maxkamadda aad imaanayso. Tan waxaa suurtowda inay tahay midda ugu horreysa ee imaatinka maxkamadda, mana aha inay noqoto hal goob maxkamadeed inaad tagto oo keliya.
- Waxaad xaq u leedahay inaad la hadashid garyaqaan (looyar) oo kaala talin doona waxa dhaca.

02 Helitaanka Garyaqaanka

Garyaqaanku aad ayuu waxtar u leeyahay isagoo ku siinaya:

- wuxuu ku fahamsiinayaa waxa dhacaya iyo waxa laguugu haysto;
- wuxuu kuu sheegayaa waxa maxkamadda ka dhaci doona iyo waxa loo baahan yahay inaad samayso;
- kuu micneyn doona qodobada sharciga, kuwaaso ah kuwo adag si loo fahmo;
- kaala talinaya inaad qiratid dembiga iyo in kale;
- adiga kuu hadlaya iyo wuxuu soo bandhigayaa difaacaaga (kiisaska maxkamadaha majistareetka, garyaqaankaaga inta badan adiga ayuu ku difaacayaa. Kiisaska Maxakamadaha Boqortooyada, garyaqaankaaga wuxuu kuu raadinayaa inuu kuu helo qof wakiil sharci kuu noqda. Wakiillada sharci waa dad si gaar ah loogu tababaray xeerka, iyagoo aan ahayn garyaqaanno ama xeer-yaqaanno);
- wuxuu kuu fasirayaa waxa laga rabo damaanadda ama go'aanka laga gaaray maxkadda; ama
- kula talinayaa haddii garyaqaanka hawshiisa aadan lacag bixinayn, iyo haddii aad u baahan tahay inaad dalbato taageero dhaqaale;

Waxaa suurtowda inuu damaanad kugu amrayo inaad aragto garyaqaan, haddii ay saas tahay, waa lagu xiri karaa isla markaasina damaanadda lagaala noqon karaa haddii aad marin waxa lagaa rabo.

Sidee loo helaa garyaqaan

Haddii lagu xiro, boliiska waa hore ayuu ku siiyay tifatirka qofka xeer-yaqaanka ama garyaqaanka shaqada leh. Hawshaan waa lacag la'aan – qofkaasii lama shaqeeyo boliiska. Waxay kuugula hadli karaan khadka telefoonka ama qof ahaan markaad joogto xarunta boliis, xitaa waxaa suurtowda inay kaaga wakiil noqdaan maxkamadda intay hawsha socoto.

Ama, waxaad xulan kartaa garyaqaankaaga. Saaxiibadaa ama ehelkaaga waxay ku siin karaan magaca qof garyaqaan ah oo ay horey u isticmaaleen, ama waxaad ka xulan kartaa liiska looyarrada ee xaafadaada degan oo aad ka heli karto Rugta Talobixinta Dadweynaha (Citizens' Advice Bureau) ama waxaad ka heli kartaa Guddiga Arrimaha Sharciga (Legal Services Commission) oo telefoonka 0845 608 1122 ama cinwaanka intarneetka ee ah www.justask.org.uk.

Haddii aadan hore ula hadlin garyaqaan inta ka horreysa maxakamadda, waxaad la hadli kartaa garyaaqaanka heeganka leh ee maxkamadda. Waxay kaaga wakiil noqon karaan maxkamadda, ama waxay ku siinayaan talo iyo taageero arrintaada ku haboon.

Ma lacagbaad bixinaysaa?

Waxaa suurtowda inaad bixiso kharashka garyaqaankaaga ama waxaa suurtowda in lagaa bixiyo. Si aad u ogaatid haddii aad dalban kartid kharashka iyo wakiilka, akhri warqadda 'Halw-gallada difaacayaasha dunuubta ee booliska iyo maxkamadda' oo ay suurtowda in ay la socoto qoraalkaan ama waydii garyaqaankaaga war intaas ka faahfaahisan.

03 Maxaa dhacayaa haddii aadan tegin maxkamaddadda

Wax kasta oo dhaca, hubi inaad tagtid maxkamadda haddii ay jiraan sabab kale, u sheeg garyaqaankaga ama maxkamadda.

Maxkamadda waxay go'aan ka gaaraysaa inaad dembiila tahay iyo in kale. Waa muhiim inaad tagto maxkamadda waqtiga saxa ah mar kasta oo lagu waydiiyo.

Haddii aad imaan weydo (sabab fiican la'aanteed) waa dembi weyn oo mudan yahay 12 bilood oo xabsi ah.

Imaatin la'aanta qof waliba ayuu waqtigu ka luminayaa – maxkamadda, boliiska, markhaatiyada, dadka dembiga laga galay iyo garyaqaannada – waana sababtaas inay maxkamaddu arrintaa si dhab ah u qaadato.

Haddaadan imaan maxkamadda aadanna siin sabab fiican inta dhegaysiga ka hor, waxaa ku dhici kara arrimahaan soo socda:

- Warqad in la soo diro oo ah **xarigaaga oo degdeg ah** iyo in lagu hayo inta maxkamadda lagu keenayo.
- Iyadoo ay ku xiran tahay kiiska laguugu soo eedeeyay, kiiskaaga waxaa la dhegaysanaa adigoo aadan joogin – taas micnaheedu wuxuu yahay Inaad fursad u helin inaad is difaacdo.
- In laguu eedeeyo **dembi saa'id ah oo 'aad ka maqnaatay maxkamadda'. Waqtiga ugu badan ee dembigaan oo kale waa 12 bilood oo xabsi ah** Maxkamadda Boqortaaya horteeda ama saddex bilood maxkamada majistareetka horteeda, xitaa haddii aadan dembi laguugu helin kiiska hore. Haddii dembi lagugu helo labada dembiba, waxaa suurtowda in laguugu xukumo xukun adag.
- Helitaan inaad 'ka maqnaatay maxkamadda' waxaa qorayaa **taariikhda dembigaaga** wuxuuna wax u dhimayaa wax waliba ee adiga kugu saabsan xitaa haddii damaanadda lagu siinayo iyo in kale.
- Waxaa suurtowda **in xabsi laguugu hayo inta maxkamaddu ay socoto.**
- Waxaad **wayn kartaa xukunka oo wax lagaa dhimo**. Haddii aad qiratid dembiga iyo inaad samaysid marka hore, waxaa suurtowda in laguugu xukumo xukun fudud. Haddii aad ka maqnaatid si aad u qiratid, waxaad waynaysaa fursadahaas oo idil.

Xitaa haddii aad timaatid maxkamadda laakiin aad tagtid sabab kale awgeed, isla markaasna aad maqnaatid markii kiiskaaga la gaaro, maxkamaddu waxay gaaraysaa ficilladaan kuwo la mid ah.

04 Maxaad samenaysaa haddii aadan imaan karin maxkamadda

- Haddii uu jiro wax degdeg ah, waa inaad la xiriirtaa maxkamadda tegaysid (iyo garyaqaankaaga haddii aad mid leedahay). Sidaas samee sida ugu dhaqasaha badan, inta ka horreysa dhagaysiga haddii ay suurtowdo.
- Haddii aadan aadi karin maxkamadda sabab caafimaad awgeed, waa inaad ka heshaa takhtarkaaga warqad caafimaad ama takhtarka isbataalka oo sheegaya inaad tegin karin maxkamadda.
- Maxkamadda waxay eegaysaa sababta aadan u imaan karin maxkamadda. Waa inaad siisaa maxkamadda war ku filan inta suurtagal ah si aad u xaqiijisid maqnaashahaaga inay tahay waxaan wax laga qaban karin.
- **Haddi aadan tegi karin maxkamadda, waa inaad tagtaa maxkamadda ama xarunta boliiska sida ugu dhaqsaha badan. Waxaad yeelan kartaa sabab fiican inaadan tegin maxkamadda, waase dembi inaadan tegin marka ay suurtowda inaad tegi kartid.**

05 Maxaad u baahan intaadan tegin maxkamadda

- Hubi inaad taqaan maxkamadda aad tegaysi. Waxaa suurtoda inaysan ahayn midaad horey u tagtay.
- Hubi inaad taqaan sidaad u tegi lahay maxkamadda. Waxaad wici kartaa maxkamadda, kuwaasoo oo ku taxan buugga teleefoonka xaafadaada, waxay ka heli kartaa jahada iyo warka gaadiidka shacabka aad isticmaali kartid. Garyaqaankaaga xitaa wuu ku jahayn karaa.
- Ugu talagal waqti ku filan. Haddii aadan hubin inta ay qaadanayso inaad ku gaartid, waxaa samaysaa ‘qiyaas fiican’ inta hore. Haddii aad isticmaalayso ama tareen, hubi inaad og tahay waqtigooda ama eeg wax isbeddel ah, hubina inaad haysatid lacag kugu filan ee aad ku gadatid tikidka intaadan tegin.
- La hadal garyaqaan si uu kuu caawiyo inaad fahamtid waxa dhaci doona iyo waxa aad filaysid.

06 Tegitaanka maxkamadda

- Waxaad arki doontaa calaamad ku caawima kuna jaheeya. Qof u sheeg inaad joogtid. Sii magacaaga qofka miiska-hore jooga ama albaab-ilaaliyaha (oo ah qofka u qaabilsan inuu eego dadka yimi isla markaasna tusa meelahay aadayaan). Kiisaska waxaa loo qoraa qofka magaciisa awoowihiisa oo la soo hormariyo (xitaa loo yaqaan isdifaacaha) iyadoo loo qoraya '*R v Defendant*'. *R* waxay ka joogtaa *Regina* (boqortadda), oo ah Boqortooyada oo ku edaynaysa.
- Miiska-hore ama albaab-ilaaliyahay wuxuu kuu sheegayaa qolka maxkamadda lagu dheganayo kiiska iyo halka aad ku sugaysid. Wuxuu xitaa kuu sheegayaan goorta kiiskaaga la dhegaysan doono.
- Haddii aad leedahay garyaqaan, waa inaad kula kulantaa maxkamadda. Wuxuu ku siinayaa talooyin ku saabsan kiiskaaga. Maxkamadaha qaar waxay leeyihiin goobo gaar ah ee loogu tala galay inaad kula hadashid garyaaqaankaaga.
- Haddii aadan lahayn garyaqaan, waxaa jiri doona garyaqaanka heeganka leh ee jooga maxkamadda oo aad la hadli kartid.

- Haddii uu jiro waqti inta ka horreysa kiiskaa, waxaa fariisan kartaa goobta wax lagu sugo ama barxadda bulshada ee qolka maxkamadda waxaadna dhegaysan kartaa kiisaska kale. Haddii aad sidaas yeeshid, u sheeg albaa-ilaaliyaha meesha aad aaday.
- Waxaa suurtowda inaad aragtid dadka loogu yeeray marqaati ka noqdaan kiiskaaga. Adiga iyo eheladaada waa inaadan u dhowaaan markhaatiyada xeer-ilaalinta, taasoo loo arki karo caga-juglayn (adigoo saaraya culays markhaatiyada, cabsi gelinaya ama isku dayaya inaad wax ka beddeshid waxay ka oran laahaayeen maxkamadda). Caga-juglaynta markhaatiyada waa dembi culus waxay wax u dhimaysa kiis qaadista.
- Waa inaadan ka tegin maxkamadda taasoo noqon karta dembi, haddise ay jiraan sababo, u sheeg albaab-ilaaliyaha. U sheeg meesha aad aadaysid, iyo sida laguula soo xiriiri karo goorta lagaaga baahdo maxkamadda.

07 Maxkamadaha kala duwan iyo qof waliba wuxuu qaabbilsan yahay

There are three kinds of court that you may be called to.

- **Maxkamadda Majistareetka**
- **Maxkamadda Boqortooyada**
- **Maxkamadda Dhallinta (kaasoo lagu dhigo maxkamadda majistareetka)**

Qofka jooga maxkamadda iyo sida loo dhigo waxay ku xiran tahay nooca dhegaysiga. Dhegaysida hore, waxaa suurtowda inay joogaa majistareetka, adiga, iyo isdifaaha iyo garyaqaannada xeer-ilaalinta. Haddii kiiskaagu bilowdo waxa suurtowda inay joogaan xeerbeegayaal iyo markhaatiyaal.

Karaani maxkamadeed ama wakiil sharci xitaa way joogaan. Waxayna hubinayaan in qof waliba ee looga baahan yahay maxkamadda inuu joogo, waxa loo baahan yahay inay dhacaan inay qabsoomaan una socdaan sida saxa ah. Wuxuu eegayaa waxa laga qoray dhacdooyinnadii hore, maxkamadaha majistareeka, wuxuu talo ka siinayaa dhinaca arrimaha xeerka.

Dad kale ayaad ku arki doontaa maxkamadda ay ku jiraan saraakiil boliis, saraaka dabagalka, saraakiisha xabsiga iyo suxufiyiin. Maxkamadda dhallinta, waxaa kaloo joogaa xubnaha Kooxda Dembiyada Dhallinyarada (Youth OffendingTeams).

Maxkamadaha Majistareetka iyo kuwa Boqortooyada inta badan dadku way u furnan yihiin, waxaana ka mid ah saaxibada iyo ehelada kuwa ku jira kiiska, inta badan waxay leeyihiin goob ay dadku fariistaan. Maxkamadda dhallinta, xubnaha bulshada waxaa loo oggol yahay oo keliya marka lagu martiqaado.

Maxkamadda Majistareerka

Inta badan kiisaska dembiyada culus oo la hor keeno maxkamadda waxaa lagu qaadaa maxkamadda majistareetka. Waxaa jiri kara mid, labo ama saddex majistareet (oo mararka qaarkood la yiraahdo garsoorayaasha nabadda ama JPs). Kuwaan waa dadka dhegaysta kiiska waana kuwa go'aanka ka gaara haddii aad dembiila tahay ama iyo haddi kaleba.



Fure: A Markhaati B Majistareet C Karaaniga maxkamadda D Garyaqaannada xeer-ilaalinta iyo difaaca E Irid-ilaaliyaha maxkamadda F Isdifaacaha G Kuwo kale

Maxkamadda Boqortooyada

Haddii laguugu soo eedeeyo dembi weyn, go'aanna lagu gaaray in laguugu qaado maxkamadda xeerbeegeed, ama wax laguugu xukumay, waxaa kiiskaga laga dhegaysanayaa Maxkamadda Boqortooyada. Kiis-qaasita Maxkamadda Boqortooyada waxaa dhegaysta garsoore iyo xeerbeeg.



Fure: A Markhaati B Garsoore C Karaaniga maxkamadda
D Garyaqaannada xeer-ilaalinta iyo difaaca
E Xubnaha xeerbeegta F Isdifaacaha

Maxkamadda Dhallinta

Kiisaska meesha lagu qaado ee isdifaaha inta u dhexaysa 10 illaa 17 jir waxaa kiiskaas lagu galaa maxkamadda dhallineed, iyo majistareerto si gaar ah loo tababaray iyadoo aysan joogin xeerbeeg.

Waxaad war intaas ka badan ka heli kartaa arrimaha maxkamadda dhallinta iyo waxa la xiriira halkaan www.rizer.co.uk.



Fure: A Markhaati B Majistareet C Karaaniga maxkamadda
D Garyaqaannada xeer-ilaalinta iyo difaaca
E Isdifaacaha F Waalidiinta G Kooxda Dembigalayaasha Dhallinta
H Irir-ilaaliye

08 Siday maxkamadda u socoto

Maxkamadda horteeda waxaa laguugu yeeri doonaa isdifaace. Magacaan waa mid kale oo ay ujeeddadiisu tahay inaad iska difaacdid dembiga laguuu soo eedeeyay. Garyaqaankaaga waxaa loogu yeeri doonaa garyaqaanka isdifaacaha.

Dhinaca kale waa xeer-ilaalinta. Caadi ahaan, Hawlgalka Xeer-ilaalinta Boqortooyada, way ka madaxbannaan yihiin boliiska, waxayna qabtaan kiisaska xeer-ilaalinta.

Waxaa jira dhowr heer ee hawlgalka maxkamadda

Qirashada dembiga

Marka ugu horreysa ee aad timaaddo, waxaa caadi ah lagu waydiin doonaa inaad qiratid dembiga ama waxa laguugu haysto. Tan waa qirasho ama inkiridda dembiga.

Haddii aad qiratid, maxkamaddu go'aan ayay gaaraysaa. (Eeg 'Go'aangaarista'.)

Haddii aadan qiran dembiga, kiisku wuxuu soconayaa maalin wax aan ka badnayn, taariikhdana marka ku xigta ayaa la qabanayaa. Maxkamadda waxay xitaa go'aan ka gaaraysa haddii lagu siinayo damaanad inta aad kiiska-qaadista sugaysid.

Haddii aad dembi gashay, waxaad qiran kartaa goor waliba inta uu kiiska socdo, laakiin marka kastoo aad horey u qirato, waxay u badan tahay inaad heshid in lagaa dhimo xukunkaaga, horey oo aad u qirato, waxaa badanaya fursadda in wax lagaa dhimo.

Garyaqaankaaga wuxuu awoodda inuu talo kaa siiyo go'aankaaga.

Xukunka

Haddii kiiskaaga la billaabo, xeer-ilaalinta waxay keenayaan wax ku saabsan arrintaada. Adiga iyo garyaqaankaga waxaad u leedihiin awooddaan inaad ka iska difaacdaan arrintaan, adigoo keeni kara waxaad ku doodaysid. Xeer-ilaalinta waa inay xaqiijisaa inaad dembiga gashay 'inta ka hoosaysa tuhun'. Haddii aad taas ku guulaystaan, waxaa laguu helayaa dembiga, haddii ay taas ku guulaysan, dembi laguugu heli maayo waana laguu 'sii daayo'.

Makamadda majistareerka, majistareetka ama garsooraha degmada ayaa go'aan ka gaaraya nooca kiiska la hor keenay.

Maxkamadda Boqortooyada waxaa go'aan ka gaaraya xeerbeegta. Xeerbeegtu waxay ka samaysan tahay 12 qofood oo ka wakiil ah 'bulshada guud ahaan'. Waa inaad maxkamadda u sheegtaa haddii aad taqaan qof ka mid ah xeerbeegta kaasoo loo sheegayo qofkaas inuu ka baxo xeerbeegta.

Hadday xeerbeegtu dhegaysato kiiska, waxay ku wada hadlayaa qol gaar ah ilaa ay go'aan gaaraan. Hadday go'aan ku heshiin, garsooraha wuxuu go'aan ku gaarayaa 'xukunka cod-badnida' iyadoo la doonayo ugu yaraan 10 ka mid ah inay gaarto. Xeerbeegta waxay iska xulaysaa xubin ka mid ah oo u noqaya 'horraad' iyadoo uu qofkaas u sheegayo maxkamadda go'aanka xeerbeegta. Tan waa xukunka. Xukunka waxaa lagu shaacinayaa maxkamad furan qof waliba dhegaysan karo.

Waxaa suurtowda inuu jiro dhegaysiyo badan intaa u dhexaysa intaad qiranaysid iyo inta uu dhammanayo, waana muhiim inaad kulligoo joogtid.

Xukumidda

Haddii laguugu qiro (laguugu helo dembiga), waxaa lagu xukumi karaa xabsi, ganaax ama waxaa lagu xukumayaa xukun inaad u shaqaysid bulshada. Haddii kiiskaaga lagu dhegaysto maxkamad majistareet, waxaa laguu dirayaa Maxkamadda Boqortooyada si laguu xukumo.

Maxkamadda inta badan waxay amraysaa in la sameeyo waxbixin hore si ay u fududayso go'aanka ay gaarayso uu ku haboon. Tan waxay qaadataa saddex usbuuc waxaana sameeya sarkaal dabagalka ah oo eegaya waxaad u baahan tahay. Dantaada weeye inaad la shaqaysid sarkaalkaan oo diyaarinaya warbixintaan.

Garyaqaankaaga wuxuu talo kaa siinayaa rafcaannada jira ee ku saabsan waxa laguu helay ama xukunkaaga.

Hawlgalka maxkamadda inta badan way dheer tahay waana wax adag. Si laguugu fududeeyo adiga iyo dadka hawshaan ku jira, waxaad:

- **arki kartaa garyaqaan talo ku siiya marka ugu dhaqsaha badan;**
- **wuxuuna hubiyanaa inaad maxkamadda timaatid.**

09 War intaas dheer

Helintaanka garyaqaanka

Tifaftirka garyaqaanka ee xaafaddaada, waxaad:

- ka wici kartaa Guddiga Hawlgalka Sharciga (gal Services Commission Legal) 0845 608 1122;
- tegi kartaa xafiiska Citizens Advice Bureau ee xaafadaada;
- eegi kartaa Xarunta Hawlgalka Bulshada Sharciga (Community Legal Services Directory) ama taxanaha garyaqaannada iyo sharciyaqaanka laga heli karo maktabyada xaafadaada; ama
- ka eeg www.justask.org.uk.

Warka dadka dhallinta ah

Waxaad eegi kartaa www.rizer.co.uk warka ku saabsan dembiyada iyo arrimaha ku saabsan dadka dhallinta ah.

Guud ahaan

Warka intaas ka badan ee ku saabsan xuquuqdaa iyo masuuliyaddada, iyo waxa aad ka filayso arrimaha ku saabsan dembiyada culculus siday u socdaan, waxaad eegi kartaa www.cjsonline.org.uk/citizen.

This includes a 'virtual' visit to court and information on everything from being interviewed to going to prison.

Haddii aadan fursan u heli karin Internet-ka, waxaad tegi kartaa maktabka xaafadaada ama internet café.

Waxaad kaloo war ka heli kartaa xafiiska talabixinta xaafadaad ama Citizens Advice Bureau.

10 Buugga Ballamaha

Ballamada iyo imaatinka maxkamadda

U isticmaal meesha banaan si aad ugu qortid waxa ku saabsan ballamada garyaqaankaaga iyo tegista maxkamadda.

Maalinta iyo saacadda	Tifaftirka

11 Tifaftirka waxa ku jira

Xiriirrada muhiimka ah

U isticmaal meeshaan bannan inaad ku qortid magacyada iyo telefoonnada ku saabsan aadna baahan tahay.

Magac	Tifaftirka xiriirka
Garyaqaanka	
Xarunta Boliiska	
Sarkaalka boliiska ee kiiska	
Maxkamadda	